

# Aqoonso oo ka Jawaab xasaasiyadda daran Anaphylaxis

## Fal-celinta xasaasiyadda cuntada ee la tuhunsan yahay ama firfircoon

MID WALBA EE CALAAMADAHADARAN SOO SOCDA

-  **SANBABADA:** Neefta oo ku qabata, hiiinraag, qufac soo noqnoqda
-  **Wadnaha:** Maqaar guduudan ama midab buluug ah, suuxid darem, garaaca wadnaha oo dacif ah, dawakhaad
-  **DHUUNTA:** Dhuunta oo xanniban ama xabeeb leh, dhibaato xagga neefsashada ama liqidda
-  **AFKA:** Barar weyn ee carrabka ama dibnaha
-  **MAQAARKA:** Firiic cuncun leh meelo badan ee jirka ah, casaan baahsan
-  **CALOOSHA:** Matag soo noqnoqda, shuban daran
-  **WAX KALE:** Dareenka in wax xun dhowaan dhici doono, walaac, jahwareer

AMA MID KA BADAN CALAAMADAHADARAN FUDUD

-  **SANKA:** Cuncunka sanka ama diif, hindhiso
-  **AFKA:** Cuncunka afka
-  **MAQAARKA:** Firiic yar, cuncun yar
-  **CALOOSHA:** Lalabo khafiif ah ama dareen raaxo la'aan

1

## ISLA MARKIIBA SII EPINEPHRINE

2

 Wac 911

Codso ambalaas wata epinephrine.

### Tixgeli Daawooyin Dheeraad ah

(Epinephrine ka dib):

- » Antihistamine
- » Daawada neefta (bronchodilator) haddii neef la qabo

### Sida loo meeleyyo jirka

- » Qofka jiifi oo lugaha kor u qaad.
- » Haddii neefsashadu ku adag tahay ama ay matagayaan, ha fadhiistaan ama dhinac u jiifi.

### Tallaabooyinka Xiga

- » Haddii calaamadaha aysan soo roonaan, ama calaamadaha soo noqdaan, qiyaaso kale ee epinephrine ah ayaa la siin karaa 5 daqiqiyo ama ka badan ka dib goorta la siiyay qiyaasta ugu dambeysey.
- » U qaad qaybta gurmadka ee Isbitalka (ER) oo halkaa joog ugu yaraan 4 saacadood sababtoo ah calaamaduhu way soo laaban karaan. Isla markiiba ogeysii xiriiryadooda degdega ah.

Ha ku tiirsanin daawada antihistamines.

Markaad shaki gasho, qofka sii daawada epinephrine oo wac 911.



FARE

[FoodAllergy.org/NewToFoodAllergy](http://FoodAllergy.org/NewToFoodAllergy)

Mobaylkaaga iskaan  
ku samee halkaan  
si aad macluumaa  
dheeraad ah iyo  
ilooin ka hesho FARE

